

## **MAINE CARE-KA LOOGU TALO GALAY DADKA MUHAAJIRIINTA AMA QAXOOTIGA.**

### **Muxuu yahay MaineCare-ku ?**

MaineCare-ku wuxuu caawiyaa dadka dakhligooda hooseeyo si ay isaga baxshaan kharashka daryeelka Caafimaad-ka, sida booqashada amaba ballamaha Takhtarka iyo qarashka lagu iibsado dawooyinka.

### **Ma heli karaa MaineCare?**

Dadka qaarkii way heli karaan Maine-Care sida :-

- 1- Carruurta 2- Waalidkood 3- 19 iyo 20 jiryada. 4- Haweenka uurka leh. 5- Duqowda naafada ah. 6- Dadka da'da ah oo 65 jirka amaba ka weyn.
  - 7- Kuwa da'doodu tahay 21 sano ilaa 64 sano oo aan carruurta lahayn.
- Qaxootiga sharciyeysan qaarkood way heli karaa MaineCare buuxa.

Qaxootiga iyo kuwa magangelyo doonka ah way heli karaan Maine Care dhameystiran.

Xitaa haddii aad tahay Muhaajir sharci ku jooga dalka , waa dhici kartaa in aad weydo MaineCare buuxa ( Full Maine Care benefits ) haddii :-

- 1- Aad leedahay degenaansho sharciyeysan ( Green Card ) 5ta sano ugu horeysa joogistaada mareekanka adigoo sharci buuxa haysta.
- 2- Kuwa xareestay applicationka degenaanshaha oo sugaya go'aanka.
- 3- Dadka xareesta magangelyada iyo kuwa arrimahooda isbeddelka ka sugaya Immigrationka.
- 4- Ama sharciiga ay ku joogaan ay kala dhiman yihiin.

Haddii aad ka mid tahay guruubkan oo aadan helin MaineCare- buuxa waxaad wali heli kartaa Maine Care-ka emergensiga.

### **Waa maxay Emergensiga Maine Care-ka?**

Emergensiga Mainecare-ka wuxuu kaliya kharashka ka bixiyaa marka xaaladda caafimaad ee ruuxaas ay tahay mid qatar ah oo qasab ay tahay in wax laqa qabto. Waxaa kaloo uu kkarashka ka bixiyaa arrimaha ku saabsan dhalidda haweenka foolanaya.

Haddii aad tahay dadka kor ku xusan kuwa ka mid ah waxa laga yaabaa in lagu siiyo kaarka MaineCare-ka kaasoo kaliya daboolo arrimaha ku saabsan xaaladaha Emergensiga ( Emergency MaineCare ).

Haddii aad qabtid su'aal ku saabsan waxa uu Maine Care-ka kaa bixinayo waxaad wici kartaa MaineCare Member Service:- 1800-977-6740 halkaasoo aad ka heli doontid jawaabo ku saabsan su'aalaha aad qabtid.

Haddii aad ka mid tahay kooxaha aan sharciyeysneen waxaad heli kartaa Emergency maineCare si uu u daboolo xaaladaha caafimaad ee deg-degga ah.

Wax kasta ha ahaadee, haddii aad uur leedahay amaba aad ka yartahay 21 jir dalkana aad sharci ku joogto waxaad heli kartaa maineCare buuxa ( Full Maine Care benefits.

Wixii su'aal ah la xariir:

Somali Culture and Development Association of maine 207- 233-6014. 207- 450-6035.  
somaliculture2000@hotmail.com

Maine Equal Justice Partners 207- 626-7058 amaba 1866-626-7059. www.mejp.org

Immigrant Legal Advocacy Project ( ILAP )  
207- 780-1593 ama 1800-497-8505. www.ilapmaine.org